

Tilmaan-bixinta Ururinta Xaakada ee Cudurka Qaaxada (TB)

Maxay Muhiim u Tahay Baaritaanka Xaakada?

Dhakhtarkaaga wuxuu u baahanayahay in uu kaa qaado qaar ka mid ah xaakada (“phlegm”) ka soo go’da sambabadaada. Shaybaarka ayaa ku baari doona xaakadaada jeermiska cudurka qaaxada (TB).

In la baaro xaakadaada waxaa weye habka ugu wanaagsan ee lagu ogaado haddii aad qabtid cudurka qaaxada (TB). Haddii aad hore u qaadanaysay daawada cudurka qaaxada (TB), baaritaanka xaakadaada waxay tahay habka ugu wanaagsan ee lagu sheego haddii ay daawada ay waxtar tahay.

Si loo hubiyo baaritaanka in uu yahay mid sax ah, waa in lagaa qaadaa xaako ka timid gudaha hoose ee sambabadaada adiga oo aad u qufacaya. Xaakada sambabadaada waa in ay noqotaa mid adag oo dheg dheg ah. Candhuufta ka timaada afkaaga waxay tahay biyo biyo ama mid khafiif ah. Ha ku tufin candhuuf

Talo-bixin: Haddii aadan xaako qufaci karin, waxa aad isku dayda in aad ku neefsata uumiiga biyaha kulul ee qubayska ama biyo lagu kar-karinay surfiyad

Sida loo qaado tijaabada xaakada

Dhakhtarkaaga ama kal-kaaliyuhu waxay ku siin doonaan koob khaas oo caag ah oo aad ku qaadayso xaakadaada. Waxa aad si taxadar leh u daba-gasha tallaabooyinkan:

1. Koobka waa in uu aad u nadiif yahay. Ha furin ilaa aad diyaar u noqotid isticmaalkiisa.
2. Isla markii aad soo toostid aroortii (ka hor intaadan waxba cunin ama cabin), ilkahaaga rumeey afkaagana biyo raaci. Ha isticmaalin dawo lagu luq-luqdo.
3. Haddii ay suuragal tahay, dibadda u bax ama dariishadda fur intaadan qaadin tijaabada xaakada ka hor. Tani waxay caawinaysa ka badbaadinta dadka kale jeermiska cudurka qaaxada (TB) marka aad qufacayso.
4. Si xoog leh u neefso hawadana isku celi ilaa 5 il-briqsi. Si tartiib ah neefta u daa. Mar kale si xoog u neefso si xoog lehna u qufac ilaa ay xaakada ka timaado afkaaga.
5. Xaakada ku tuf koobka caagga ah.
6. Arrintani ku cel-celi ilaa ay xaakadu ka gaarto khadka 5 mililitre (ama ka badan) ee koobka caagga ah. Tani waxay noqon karta ilaa hal qaado oo xaaka ah.
7. Koobka si fiican u xir si uusan u dilaacin.
8. Dhaq oo dibadana ka qallaji koobka.
9. Taariikhda aad qaaday xaakada koobka korkiisa ku qor
10. Koobka ku rid sanduuq yar ama baakada kal-kaaliyuhu uu ku siiyey.
11. Koobka waxa aad siisa isbitaal yarahaaga ama kal-kaaliyahaaga. Koobka habeenkii waxa aad ku hayn kartaa qaboojiyaha haddii loo baahdo. Ha ku ridin qaybta barafka ee qaboojiyaha ama ha ku dhaafin heer kulka qolka guriga.